

XAASHIDA MACLUUMAADKA**Loogu Talagalay ka hortagga COVID-19 (Corona Virus Disease 2019) Cudurka Korona Fayras 2019**

(Tallaalka Aasaasiga ah iyo Tallaalada Xoojiyaha ah) – iyadoo la isticmaalayo tallaalka vektorka – (tallaalka COVID-19 Janssen® COVID-19 oo ay soo saartay Janssen Cilag International/Johnson & Johnson

Laga bilaabo 14ka Febraayo 2022 (warqadan macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusbooneysiiyaa)

AUFKLÄRUNGSMERKBLATT

Zur Schutzimpfung gegen COVID-19 (Corona Virus Disease 2019)

(Grundimmunisierung und Auffrischimpfungen) – mit Vektor-Impfstoff – (COVID-19 Vaccine Janssen® von Janssen Cilag International/Johnson & Johnson)

Stand: 14. Februar 2022 (dieses Aufklärungsmerkblatt wird laufend aktualisiert)

Waa maxay astaamaha COVID-19?

Astaamaha soo noqnoqda ee COVID-19 waxaa ka mid ah qufac qalalan, qandho, neefta oo ku qabata, iyo sidoo kale luminta dareenka wax dhadhaminta iyo wax urinta. Dareen guud oo ah caafimaad darro oo ay la socdaan madax xanuun iyo addimo xanuun, cunaha oo xanuuna, iyo duufsasho ayaa sidoo kale la soo sheegay. Si dhif ah, bukaanada waxay soo sheegaan wax dhibaatooyin ah oo la xiriira caloosha, caabuqa indhaha, iyo bararka qanjidhaha. Waxyeello soo gaadha neerfayaasha ama nidaamka wadnaha iyo sidoo kale jiritaanka koorsooyinka cudurka oo joogto ah waa suurtagal ah. In kasta oo cudurku inta badan socdo muddo gaaban oo bukaannada intooda badani si buuxda uga bogsadaan, hadana cudurku wuxuu leeyahay koorsooyin daran tusaale burukiito/koolbo aaryo, ayaa dhacdaa sidoo kale taasoo sababi karta dhimasho. Gaar ahaan carruurta iyo dhallinyaradu waxay badanaa yeeshaan jirro fudud; si dhif ah ayay u qaadaan xaaladaha daran ee cudurka iyo dhif ku yahay kooxdan waxayna guud ahaan dhacaan marka ay qabaan oo keliya xaalado caafimaad oo soo jireen ahaa. Guud ahaan, koorsooyinka daran ee COVID-19 iyo dhibaatooyinka caafimaad ayaa naadir iyo dhif ku ah dumarka uurka leh, laakiin uurka laftiisa ayaa keenaya halis la xiriirta xaalada daran oo cudurka ah. Shakhsiyadka qaba nidaamka difaaca jirka ee daciifka ah waxay ku jiraan halis sii kordheysa oo ku aadan koorsooyinka cudurada daran iyo halis sare oo natiijadeedu tahay dhimasho.

Was sind die Symptome von COVID-19?

Zu den häufigen Krankheitszeichen von COVID-19 zählen trockener Husten, Fieber, Atemnot sowie ein vorübergehender Verlust des Geruchs- und Geschmackssinnes. Auch ein allgemeines Krankheitsgefühl mit Kopf- und Gliederschmerzen, Halsschmerzen und Schnupfen wird beschrieben. Seltener wird über Magen-Darm-Beschwerden, Bindehautentzündung und Lymphknotenschwellungen berichtet. Folgeschäden am Nerven- oder Herz-Kreislaufsystem sowie langanhaltende Krankheitsverläufe sind möglich. Obwohl ein milder Verlauf der Krankheit häufig ist und die meisten Erkrankten vollständig genesen, kommen auch schwere Verläufe beispielsweise mit Lungenentzündung vor, die zum Tod führen können. Insbesondere Kinder und Jugendliche haben zumeist milde Krankheitsverläufe; schwere Verläufe sind bei ihnen selten und kommen meist bei bestehenden Vorerkrankungen vor. Bei Schwangeren sind schwere COVID-19-Verläufe und Komplikationen insgesamt selten, jedoch stellt die Schwangerschaft an sich einen relevanten Risikofaktor für schwere Verläufe dar. Personen mit Immunschwäche können einen schwereren Krankheitsverlauf und ein höheres Risiko für einen tödlichen Verlauf haben.

Waa maxay tallaalada fektarka ee COVID-19?

Tallaalka Janssen® COVID-19 ee ay soo saarto shirkadda Janssen Cilag International/Johnson & Johnson ee halkan looga hadlay waxa uu tilmaamayaa tallaalka ku salaysan fektar oo ku tiirsan tignoolajiyada casriga ah. Tallaalada fektarka ee loogu talagalay cudurrada kale waa la ansixiyey.

Tallaalku wuxuu ka kooban yahay wax loo yaqaano fayrasyada fektarka. Fayrasyadan si wanaagsan ayaa loo daraasadeeyay mana tarmaan. Ma aha tallaal nool.. Marka, dadka lagu tallaaley, fayraska tallaalka uma gudbin karaan dadka kale. Fayraska vector-ku wuxuu ka kooban yahay oo u sidaa macluumaadka hidaha ee hal borotiin oo ah fayraska korona, kaas oo loogu yeero borotiinka kor u kaca.

Macluumaadka uu sido fayraska vector-ka laguma dhex darayo hiddo-sidaha bini-aadamka kadib qaadashada tallaalka, laakiin kadib markii uu dhex galo unugyada jirka waa “la akhriyaa”. Markaas kadibna, unugyadaas ayaa soo saara borotiinada “spike” ah. Noocyada borotiinada kor u kaca ee uu samaysto jirka qofka la tallaalay waxaa difaaca jirka u aqoonsan yahay inay yihiin borotiino shisheeye ah. waxaa sidaas darteed la soo saaraa antiboodhiyo iyo unugyada difaaca jirka si ay ula dagaalamaan fayraskaas. Arrintani waxay abuuraysaa jawaab celin difaac jireed ah.

Fayraska vector-ku waa la burburiyaa muddo gaaban kadib. Intaa wixii ka dambeeya, ma jirayaan borotiin fayras oo dheeraad ah (borotiinka kor u kaca) oo la soo saarayo.

Was sind COVID-19-Vektor-Impfstoffe?

Es handelt sich bei dem hier besprochenen Impfstoff COVID-19 Vaccine Janssen® von Janssen Cilag International/Johnson & Johnson um einen vektorbasierten Impfstoff, der auf einer modernen Technologie beruht. Vektor-Impfstoffe gegen andere Erkrankungen sind bereits zugelassen.

Der Impfstoff besteht aus sogenannten Vektorviren. Diese Viren sind gut untersucht und können sich nicht vermehren. Es handelt sich nicht um einen Lebendimpfstoff. Geimpfte können also keine Impfviren auf andere Personen übertragen. Das Vektorvirus enthält und transportiert die genetische Information für ein einzelnes Eiweiß des Corona-Virus, das sogenannte Spikeprotein.

Die vom Vektorvirus transportierte Information wird nach der Impfung nicht ins menschliche Erbgut eingebaut, sondern nach Eintritt in die Zellen „abgelesen“. Daraufhin stellen diese Zellen dann das Spikeprotein selbst her. Die so vom Körper des Geimpften gebildeten Spikeproteine werden vom Immunsystem als Fremdeiweiße erkannt. In der Folge werden Antikörper und Abwehrzellen gegen das Spikeprotein des Virus gebildet. So entsteht eine schützende Immunantwort.

Das Vektorvirus wird nach kurzer Zeit wieder abgebaut. Dann wird auch kein Viruseiweiß (Spikeprotein) mehr hergestellt.

Sidee loogu qaataa tallaalka goobta lagu bixiyo tallaalka aasaasiga ah?

Tallaalka waxaa lagu duraa muruqa gacanta sare. Si loogu hoggaansamo shatiga tallaalka, tallaalka Janssen® COVID-19 waxa la bixiyaa hal mar. Si kastaba ha ahaatee, si qofka loogu tixgeliyo in si buuxda loo tallaalay, laba qiyaastood inuu qaato ayaa loo baahan yahay. Sababo la xiriira waxtarka difaaca ee tallaalkaan oo hooseeya maadaama la qaadanaayo kaliya hal qiyaas/doos oo tallaalka Janssen® COVID-19 ah marka loo barbardhigo tallaallada kale ee la heli karo ee ka dhanka ah COVID-19, Guddiga Joogtada ee Machadka Robert Koch ee Tallaalka (STIKO) waxay sidaas awgeed ku talinayaan in la qaato tallaalka ah tallaalka mRNA-ga (Comirnaty® dadka ay da’adoodu ka hooseeyso 30 sano iyo haweenka uurka leh ee ku jira seddaxdooda bilood ee 2^{aad} waa inay qaataan Comirnaty®, dadka ay da’adoodu ka koreyso 30 sano, waa inay qaateen Comirnaty® or Spikevax®) iyada oo ujeedadu tahay kordhinta difaaca uu bixiyo tallaalka. Iyada oo aan loo eegin da'da, tallaalkan dheeraadka ah ee mRNA-ga waa in aan la siinin qofka wax ka yar 4 toddobaad guddahood kadib qaadashada qiyaasta halka mar ah ee tallaalka Janssen® COVID-19. haddii ay jiraan xaalado liddi ku ah tallaallada mRNA ama haddii uu jiro codsi shakhsiyeed kadib marka lagala hadlo dhakhtarka, waxaa suurtagal ah in sidoo kale tallaalka Janssen® COVID-19 loo isticmaalo dadka waaweyn, iyada oo aan loo eegin da'da, si kor loogu qaado waxtarka tallaalka aasaasiga ah (qiyaasta tallaalka 2^{aad}) ama tallaalka xoojiyaha ah

Tallaalka aasaasiga ah ee la qaato kadib marka uu qofku ku dhaco caabuq la xaqiijiyay:

Shakhsiyaadka aan la tallaalin ee qaba infekshanka SARS-CoV-2 ee la xaqiijiyay waxay ka sokow tallaalka aasaasiga ah qaadanayaan, marka loo eego talooyinka STIKO, hal qiyaas oo tallaalka ah oo keliya oo la siinayo 3 bilood kadib laga bilaabo xilliga uu ku dhacay infekshanka (marka laga reebo haddii ay la dhibtoonayaan Difaaca Jirka oo Daciif ka ah. Xaaladaha noocan ah waxaa lagu

go'aansan doonaa kiisba-kiis haddii hal tallaalka ku filan yahay iyo in kale.). Dadka, kadib markii la siiyo qiyaasta tallaalka ee ugu horreysa, laga helo infekshan la xaqiijiyay oo ah SARS-CoV-2 4 toddobaad gudahood ee tallaalkii hore waxay qaadanaayan qiyaasta 2aad ee tallaalka ugu yaraan 3 bilood kadib laga soo bilaabo xilliga uu ku dhacay infekshanka. Haddii infekshanka SARS-CoV-2 uu ku dhaco 4 toddobaad kadib qaadashada tallaalka halka mar ah, ma jirto tallaalka oo loo siinayo tallaalka aasaasi ahaan.

Tallaalka COVID-19 oo ay la socdaan tallaalka kale:

Marka loo eego tallooyinka STIKO, tallaallada COVID-19 waxaa isku wakhti lala bixin karaa tallaallada kale ee dhintay sida tallaallada hargabka. Xaaladdan oo kale, falcelinta tallaalka ayaa laga yaabaa inay ka badan tahay marka qiyaasaha/doosaha la bixiyo waqtiyo kala duwan. Marka tallaalka kala duwan la bixiyo isku mar, guud ahaan waa in qofka laga siiyaa tallaalka addimo kala duwan. Ugu yaraan in u dhaxeeyso 14 maalmood kahor iyo kadib qaadashada tallaalka kasta oo COVID-19 ah waa in la ilaaliyaa kahor inta aan qofkaas la siin tallaalka nool.

Wie wird der Impfstoff im Rahmen der Grundimmunisierung verabreicht?

Der Impfstoff wird in den Oberarmmuskel gespritzt. Gemäß der Zulassung wird der Impfstoff COVID-19 Vaccine Janssen® 1-mal verabreicht. Um als vollständig geimpft zu gelten, sind jedoch zwei Impfstoffdosen notwendig. Aufgrund der im Vergleich mit anderen verfügbaren COVID-19-Impfstoffen geringeren Schutzwirkung der einmaligen Gabe von COVID-19 Vaccine Janssen® empfiehlt die Ständige Impfkommission beim Robert Koch-Institut (STIKO) dafür eine Impfstoffdosis eines mRNA-Impfstoffs (für Personen unter 30 Jahren und Schwangere ab dem 2. Schwangerschaftsdrittel unabhängig vom Alter Comirnaty®, für Personen ab 30 Jahren Comirnaty® oder Spikevax®) zur Optimierung des Impfschutzes. Unabhängig vom Alter soll diese zusätzliche Impfstoffdosis eines mRNA-Impfstoffes ab 4 Wochen nach der einmaligen Gabe von COVID-19 Vaccine Janssen® erfolgen. Bei Vorliegen einer Kontraindikation gegen mRNA-Impfstoffe oder bei individuellem Wunsch ist es nach ärztlicher Aufklärung grundsätzlich möglich, bei Erwachsenen unabhängig vom Alter für die Optimierung der Grundimmunisierung (2. Impfstoffdosis) oder für die Auffrischimpfung auch die COVID-19 Vaccine Janssen® zu verwenden.

Grundimmunisierung nach nachgewiesener Infektion:

Ungeimpfte Personen mit nachgewiesener SARS-CoV-2-Infektion erhalten zur Grundimmunisierung entsprechend der Empfehlung der STIKO lediglich eine Impfstoffdosis mit einem Abstand von mindestens 3 Monaten zur Infektion (sofern bei ihnen keine Immunschwäche vorliegt. In diesen Fällen wird im Einzelfall entschieden, ob die einmalige Impfung ausreichend ist.).

Personen, die nach der 1. Impfstoffdosis eine gesicherte SARS-CoV-2-Infektion im Abstand von unter 4 Wochen zur vorangegangenen Impfung hatten, erhalten eine 2. Impfstoffdosis mit einem Abstand von mindestens 3 Monaten zur Infektion. Ist die SARS-CoV-2 Infektion in einem Abstand von 4 oder mehr Wochen zur vorangegangenen 1-maligen Impfung aufgetreten, ist keine weitere Impfung zur Grundimmunisierung notwendig.

COVID-19-Impfung gleichzeitig mit anderen Impfungen:

Gemäß STIKO können COVID-19-Impfungen mit anderen Totimpfstoffen wie beispielsweise Grippeimpfstoffen gleichzeitig verabreicht werden. In diesem Fall können Impfreaktionen etwas häufiger auftreten als bei der zeitlich getrennten Gabe. Bei der gleichzeitigen Verabreichung verschiedener Impfungen sollen die Injektionen in der Regel an unterschiedlichen Gliedmaßen erfolgen. Zu Impfungen mit Lebendimpfstoffen soll ein Abstand von mindestens 14 Tagen vor und nach jeder COVID-19-Impfung eingehalten werden.

Waa maxay habraaca loo marayo talaallada xoojiyaha ah?

Laga soo bilaabo Diseembar 2021, tallaalka Janssen® COVID-19 waxaa loo ansixiyey in qiyaas 2aad ahaan loo isticmaalo taas oo la siinayo qofka ugu yaraan 2 bilood kadib qaadashada qiyaasta 1aad ee tallaalka. Kadib marka uu qofka qaato qiyaasta 1aad ee tallaalka Janssen® COVID-19 STIKO waxay ku talinaysaa qiyaas labaad in laga dhigo tallaalka mRNA ah si kor loogu qaado waxtarka tallaalka aasaasiga ah. Intaa waxa dheer STIKO waxay ku talinaysaa sidoo kale qiyaas 3aad oo dheeri ah in qofka la siiyo (tallaalka xoojiyaha ah) ugu yaraan 3 bilood kadib qaadashada qiyaasta 2aad ee tallaalka mRNA ah.

"Tallaallada xoojiyaha ah ee labaad": Intaas waxaa dheer, STIKO waxay ku talinaysaa in dadka da'doodu ka weyn tahay 70 sano, ah dad degan, iyo kuwa lagu taageerayo, xarumaha daryeelka iyo sidoo kale shakhsiyaadka ku jira khatarta sii kordheysa ee xaaladaha cudurrada daran ee ku jira xarumaha daryeelka isku dhafan iyo shakhsiyaadka da'da 5 sano jirka ah kuwaas oo nidaamka difaaca jirkooda uu hoos u dhacay waa inay dhamaantood qaataan tallaalka xoojiyaha ah oo labaad oo ah

tallaalka mRNA kaas oo ay tahay in la qaato ugu yaraan 3 bilood kadib qaadashada tallaalkii xoojiyaha ahaa ee koowaad. Dadka ka shaqeeya xarumaha caafimaadka iyo daryeelka waa inay qaataan tallaalkii xoojiyaha ah oo labaad kadib wax aan ka yarayn 6 bilood kadib qaadashada tallaalkii xoojiyaha ahaa ee koowaad. STIKO waxay ku talinaysaa in haweenka uurka leh, iyada oo aan loo eegin da'dooda, ay qaataan qiyaas tallaalka xoojiyaha ah oo keliya tallaalka mRNA Comirnaty® ah kadib saddexda bilood ee 2aad ee uurkooda.

Shakhsiyaadka da'doodu ka yar tahay 30 sano, kaliya Comirnaty® ayaa lagula talinayaa inay isticmaalaan. Shakhsiyaadka da'doodu ka weyn tahay 30 sano, labada nooc ee tallaalka mRNA ee hadda la heli karo si isku mid ah ayey ugu habboon yihiin.

Xaaladaha lidka ku ah tallaalka mRNA ama haddii uu jiro codsi shakhsiyeed, guud ahaan waa suurtagal kadib kala caddaynta dhakhtarka in sidoo kale tallaalka Janssen® COVID-19 loo isticmaalo dadka waaweyn, iyada oo aan loo eegin da'da, si kor loogu qaado waxtarka tallaalka aasaasiga ah (qiyaasta tallaalka ee 2aad) ama tallaalka xoojiyaha ah

Wie ist mit Auffrischimpfungen zu verfahren?

COVID-19 Vaccine Janssen® ist seit Dezember 2021 als 2. Impfstoffdosis im Abstand von mindestens 2 Monaten zur 1. Impfstoffdosis zugelassen. Die STIKO empfiehlt nach der 1. Impfstoffdosis mit COVID-19 Vaccine Janssen® weiterhin zur Optimierung der Grundimmunisierung eine 2. Impfstoffdosis mit einem mRNA-Impfstoff. Darüber hinaus empfiehlt die STIKO auch weiterhin eine 3. Impfstoffdosis (Auffrischimpfung) im Abstand von mindestens 3 Monaten zur 2. Impfstoffdosis mit einem mRNA-Impfstoff. „2. Auffrischimpfung“: Für Menschen ab 70 Jahren, für Bewohner/innen und Betreute in Einrichtungen der Pflege sowie für Personen mit einem Risiko für einen schweren Krankheitsverlauf in Einrichtungen der Eingliederungshilfe und für Personen ab dem Alter von 5 Jahren mit Immunschwäche empfiehlt die STIKO eine 2. Auffrischimpfung mit einem mRNA-Impfstoff in einem Mindestabstand von 3 Monaten nach der 1. Auffrischimpfung. Tätige in medizinischen Einrichtungen und Pflegeeinrichtungen sollen eine 2. Auffrischimpfung nach frühestens 6 Monaten erhalten.

Schwangeren empfiehlt die STIKO unabhängig vom Alter eine Auffrischimpfung ab dem 2. Schwangerschaftsdrittel nur mit dem mRNA-Impfstoff Comirnaty®.

Für Personen unter 30 Jahren wird ausschließlich der Einsatz von Comirnaty® empfohlen. Für Personen im Alter ab 30 Jahren sind beide derzeit verfügbaren mRNA-Impfstoffe (Comirnaty® und Spikevax®) gleichermaßen geeignet.

Bei Vorliegen einer Kontraindikation gegen mRNA-Impfstoffe oder bei individuellem Wunsch ist es nach ärztlicher Aufklärung grundsätzlich möglich, bei Erwachsenen unabhängig vom Alter für die Optimierung der Grundimmunisierung (2. Impfstoffdosis) oder für die Auffrischimpfung auch COVID-19 Vaccine Janssen® zu verwenden.

Sidee ayuu waxtar u leeyahay tallaalka?

Daraasadaha lagu baarayo difaaca tallaalka ee nooca fayraska Delta ayaa muujinaya waxtar qiyaas ahaan ah 70% (1 doos/qiyaas oo ah tallaalka Janssen® COVID-19) oo xagga yareynta khatarta jirro daran ah; Ka-hortagga koorsooyinka fudud ee cudurku ayaa guud ahaan hooseeya. Waxtarka ayaa kor loo qaaday, iyadoo la raacayo talooyinka STIKO, qofkana la siinayo tallaalka mRNA ah si loo wanaajiyo waxtarka tallaalka aasaasiga ah. Xog ku saabsan saamaynta difaaca ee ka dhanka ah nooca fayraska ee omicron ayaan weli laga helin tallaalka Janssen® COVID-19. Waxaa loo qaadan karaa in - si la mid ah tallaalka kale ee COVID-19 - ka dib markii qofka la siiyo tallaalka xoojiyaha ah (qiyaasta 3aad ee tallaalka) waxaa jira saameyn xagga difaaca ah oo si weyn loo wanaajiyay, difaacaas oo ka dhan ah caabuqa astaamaha leh iyo midka daran ee uu sababo nooca fayraska Omicron.

Wie wirksam ist die Impfung?

Studien, die den Schutz gegenüber der Delta-Variante untersuchten, zeigen eine Wirksamkeit von etwa 70 % (1 Impfstoffdosis COVID-19 Vaccine Janssen®) bezüglich der Verhinderung einer schweren Erkrankung; der Schutz vor milden Krankheitsverläufen ist im Allgemeinen niedriger. Die Wirksamkeit wird, wie von der STIKO empfohlen, mit einer weiteren Gabe eines mRNA-Impfstoffes zur Optimierung der Grundimmunisierung verbessert. Daten bezüglich der Schutzwirkung vor der Omikron-Variante liegen für COVID-19 Vaccine Janssen® bisher nicht vor. Es kann davon ausgegangen werden, dass – analog zur Impfung mit anderen COVID-19-Impfstoffen – nach Verabreichung einer Auffrischimpfung (3. Impfstoffdosis)

eine erheblich verbesserte Schutzwirkung gegenüber einer symptomatischen und schweren Infektion mit der Omikron-Variante vorliegt.

Yay tahay in laga tallaalo COVID-19 iyadoo la isticmaalayo tallaalka Janssen® COVID-19?

Tallaalka Janssen® COVID 19 waxaa loo ansixiyey/loo-shatiyeeyay dadka ka weyn da'da 18 sano. STIKO ayaa wali ku talinaysa kaliya in tallaalka Janssen® COVID-19 loo isticmaalo dadka da'doodu tahay 60 ama ka weyn.

Dadka da'doodu u dhaxayso 18 iyo 59 jir, ku tallaalida tallaalka Janssen® COVID-19 ayaa sidoo kale suurto ah, inkastoo aan lagu talin, kadib markii la helo oggolaansho caafimaad iyo oggolaanshaha shakhsiyeed ee ku aadan khatarta ka dhalan karta taas oo uu bixinayo qofka la tallaalayo sida waafaqsan hagista STIKO. Qiimaynta halista shaqsiyeed ee qofka la tallaalayo ee ku saabsan t tallaalka Janssen® COVID-19, halista dhibaatooyinka hoos lagu sharraxay, dhinaca kalena, iyo halista caabuqa SARS-CoV-2 ama cudurka COVID-19, dhanka kalena, waa in la miisaamaa. Ujeedadaas awgeed, waa in la ogaadaa, hal dhinac, in xinjirrada dhiigga (thromboses) ee hoos lagu sharraxay isla mar ahaantaana la yareeyo tirada xinjirowga dhiigga (thrombocytopenia) ayaa dhacday marar aad u yar (in ka yar 0.01% dadka la tallaalay e kooxda da'daan) xitaa dadka ka yar 60 sano, sida ku cad heerka aqoonta ee hadda. Dhanka kale, waa inay jirtaa qiimayn shaqsiyeed oo ku saabsan haddii halista shaqsiyeed ee caabuqa SARS-CoV-2 (tusaale ahaan nololsha shaqsiyeed iyo duruufaha shaqada iyo dabeecadda) ama halista shaqsiyeed ee daran oo laga yaabo inay disho COVID-19 (tusaale ahaan cudurrada uu horay qofka u qabay awgeed) ayaa sare u kaca.

Wer sollte mit COVID-19 Vaccine Janssen® gegen COVID-19 geimpft werden?

Der Impfstoff COVID-19 Vaccine Janssen® ist für Personen ab 18 Jahren zugelassen. Die STIKO empfiehlt die Impfung mit COVID-19 Vaccine Janssen® jedoch nur für Personen, die 60 Jahre und älter sind.

Für Personen zwischen 18 und 59 Jahren ist die Impfung mit COVID-19 Vaccine Janssen® laut STIKO-Empfehlung entsprechend der Zulassung nach ärztlicher Aufklärung und bei individueller Risikoakzeptanz der zu impfenden Person möglich, aber nicht empfohlen. Für die individuelle Risikoabschätzung durch die zu impfende Person bezüglich der Impfung mit COVID-19 Vaccine Janssen® sollten einerseits das Risiko der unten beschriebenen Komplikationen und andererseits das Risiko für eine Infektion mit SARS-CoV-2 oder eine COVID-19-Erkrankung abgewogen werden. Hierfür sollte zum einen beachtet werden, dass die unten beschriebenen Blutgerinnsel (Thrombosen) mit gleichzeitiger Verringerung der Blutplättchenzahl (Thrombozytopenie) nach derzeitigem Kenntnisstand auch bei Personen unter 60 Jahren sehr selten (weniger als 0,01 % der geimpften Personen in dieser Altersgruppe) aufgetreten sind. Zum anderen sollte individuell eingeschätzt werden, ob das persönliche Risiko für eine Infektion mit SARS-CoV-2 (z.B. persönliche Lebens- und Arbeitsumstände und Verhalten) oder das persönliche Risiko für eine schwere und möglicherweise tödliche Verlaufsform von COVID-19 (z. B. aufgrund von Grunderkrankungen) erhöht ist.

Yaan lagu talaali karin tallaalka Janssen® COVID-19?

Maadaama aan tallaalka Janssen® COVID 19 loo oggolaan carruurta iyo da'yarta ilaa iyo 17 sano jirka ah, waa in aan lagu tallaalin tallaalka Janssen® COVID 19. Shakhsiyaadka da'doodu ka yar tahay 60 sano, STIKO waxay ku talinaysaa in tallaalka mRNA loo isticmaalo tallaalka aasaasiga ah iyo sidoo kale tallaalada xoojiyaha ah labadaba. Dadka da'doodu ka yartahay 30 jir, waa in si gaar ah loogu isticmaalaa tallaalka mRNA Comirnaty®.

Haweenka uurka leh waa inaan lagu tallaalin tallaalka Janssen®. Taas bedelkeedana, kadib dhamaadka saddexda bilood ee 2aad ee uurkooda, waa in lagu tallaalaa tallaalka mRNA Comirnaty® iyada oo aan loo eegin da'dooda. STIKO waxay ku talinaysaa in haweenka naaska nuujinaya ee aan tallaalinayn sidoo kale lagu tallaalo tallaalka mRNA (kuwa ka yar da'da 30 sano waa in lagu tallaalo tallaalka mRNA Comirnaty®) oo waa inaan lagu tallaalin tallaalka Janssen®.

Dadka qaba jirro ba'an oo ay weheliso qandho (38.5 °C iyo wixii ka sareeya ah) waa in la tallaalaa oo keliya kadib markii ay ka soo bogsadaan. Si kastaba ha noqotee, heerkul qabow ah ama xoogaa sarreeya (ka hooseeya 38.5 °C) ma aha sabab dib loogu dhigo qaadashada tallaalka. Dadka xasaasiyad ku ah walaxda ka samaysan tallaalka waa inaan la tallaalin - fadlan u sheeg dhakhtarka tallaalka bixinaya haddii aad xasaasiyad qabto kahor inta aan lagu tallaalin.

Shakhsiyaadka uu dhiiggoodu xinjiroobo isla markaana ku yar tirada unugyada dhiigga platlet-ka (thrombosis iyo thrombocytopenia syndrome) taas oo dhacda kadib qaadashada tallaalka COVID-19 waa in aanay qaadan tallaalka Janssen® COVID-19. Sidoo kale, qof uu waligiis ku soo dhacay xanuunka qubidda dheecaannada xididada (capillary leak syndrome) waa inaan lagu tallaalin tallaalka Janssen® COVID-19.

Wer soll nicht mit COVID-19 Vaccine Janssen® geimpft werden?

Da COVID-19 Vaccine Janssen® für Kinder und Jugendliche bis einschließlich 17 Jahre nicht zugelassen ist, sollen diese nicht mit COVID-19 Vaccine Janssen® geimpft werden. Bei Personen unter 60 Jahren empfiehlt die STIKO, zur Grundimmunisierung als auch zur Auffrischimpfung einen mRNA-Impfstoff zu verwenden. Im Alter unter 30 Jahren soll die Impfung ausschließlich mit dem mRNA-Impfstoff Comirnaty® durchgeführt werden. Schwangere sollen nicht mit COVID-19 Vaccine Janssen® geimpft werden. Vielmehr sollen sie ab dem 2.-Schwangerschaftsdrittel ungeachtet ihres Alters mit dem mRNA Impfstoff Comirnaty® geimpft werden. Die STIKO empfiehlt ungeimpften Stillenden ebenfalls die Impfung mit mRNA-Impfstoffen (bei Stillenden unter 30 Jahren mit dem mRNA-Impfstoff Comirnaty®), und nicht mit COVID-19 Vaccine Janssen®.

Wer an einer akuten Krankheit mit Fieber (38,5 °C oder höher) leidet, soll erst nach Genesung geimpft werden. Eine Erkältung oder gering erhöhte Temperatur (unter 38,5 °C) sind jedoch kein Grund zur Verschiebung der Impfung. Bei einer Überempfindlichkeit gegenüber einem Impfstoffbestandteil sollte nicht geimpft werden: Bitte teilen Sie der Ärztin/dem Arzt vor der Impfung mit, wenn Sie Allergien haben.

Personen, bei denen nach einer Impfung mit einem COVID-19-Impfstoff Blutgerinnsel mit einer Verringerung der Blutplättchenzahl (Thrombose mit Thrombozytopenie-Syndrom) aufgetreten sind, dürfen nicht COVID-19 Vaccine Janssen® erhalten. Personen, die jemals an einem Kapillarlecksyndrom gelitten haben, dürfen ebenfalls nicht mit COVID-19 Vaccine Janssen® geimpft werden.

Sidee ayay tahay inaan u dhaqmo kahor iyo kadib qaadashada tallaalka?

Haddii aad hadda kahor suuxday kadib markaad qaadatay tallaal hore ama cirbad kale ama ay u badan tahay inaad yeelato xasaasiyad degdeg ah ama aad hore usoo ula soo kulantay xasaasiyado kel, fadlan la socodsii dhakhtarka ku siinaya tallaalka kahor intaan lagu tallaalin. Isaga/iyada ayaa markaa ku ilaalin kara muddo dheer kadib qaadashada tallaalka.

Qaadashada tallaalkaaga kahor, fadlan la socodsii dhakhtarkaaga haddii aad qabtid cillad xinjirowga dhiiga ah, haddii aad hore ula soo kulantay yeraan shaha tirada unugyada dhiigga (hoos u dhaca tirada unugyada dhiigga platelet-ka) ama aad qaadato daawada xinjirowga lidka ku ah. Dhakhtarkaaga ayaa kuu kala cadeyn doona haddii lagu talaali karo iyadoo la qaadayo taxaddaro fudud.

Fadlan sidoo kale u sheeg dhakhtarka kahor tallaalka haddii aad xasaasiyad qabto ama aad xasaasiyad isku aragtay kadib qaadashada tallaal hore. Dhakhtarka ayaa kuu kala cadeyn doona haddii ay jirto sabab aadan u qaadan karin tallaalka.

Maalmaha ugu horreeya kadib qaadashada tallaalka, waa inaad ka fogaataa jimicsiga jirka iyo waxqabad aan caadiga ahayn. Haddii aad la kulanto xanuun ama qandho kadib qaadashada tallaalka, dawooyinka ka hortagga xanuunka ayaa la qaadan karaa. Waxaad arrintan kala tashan kartaa dhakhtarkaaga.

Fadlan ogsoonaw in difaacu aanu isla markiiba bilaabmi doonin kadib qaadashada tallaalka oo sidoo kalana uusan si isku mid ah uga soo bixi doonin dhammaan dadka la tallaalay. Waxaa intaa dheer,

shakhsiyaadka la tallaalay waxay faafin karaan fayraska iyagoo aan xanuunsanin, inkastoo khatarta si muuqata loo dhimay marka loo eego shakhsiyaadka aan la tallaalin. Fadlan sidaas darteed sii wad ilaalinta kala fogaanshaha bulshada/nadaafadda/xirashada maaskarada wejiga iyo xeerarka hawo-qaadashada.

Wie verhalte ich mich vor und nach der Impfung?

Wenn Sie nach einer früheren Impfung oder anderen Spritze ohnmächtig geworden sind, zu Sofortallergien neigen oder andere Reaktionen hatten, teilen Sie dies bitte der Ärztin/dem Arzt vor der Impfung mit. Dann kann sie/er Sie nach der Impfung gegebenenfalls länger beobachten.

Informieren Sie bitte die Ärztin/den Arzt vor der Impfung, wenn Sie an einer Gerinnungsstörung leiden, in der Vergangenheit eine Immunthrombozytopenie (Verringerung der Blutplättchenzahl) hatten oder gerinnungshemmende Medikamente einnehmen. Die Ärztin/der Arzt wird mit Ihnen abklären, ob Sie unter Einhaltung einfacher Vorsichtsmaßnahmen geimpft werden können.

Teilen Sie bitte auch mit, wenn Sie nach einer Impfung in der Vergangenheit eine allergische Reaktion hatten oder Allergien haben. Die Ärztin/der Arzt wird mit Ihnen abklären, ob etwas gegen die Impfung spricht.

In den ersten Tagen nach der Impfung sollten außergewöhnliche körperliche Belastungen und Leistungssport vermieden werden. Bei Schmerzen oder Fieber nach der Impfung können schmerzlindernde/fiebersenkende Medikamente eingenommen werden. Ihre Ärztin/Ihr Arzt kann Sie hierzu beraten.

Bitte beachten Sie, dass der Schutz nicht sofort nach der Impfung einsetzt und auch nicht bei allen geimpften Personen gleichermaßen vorhanden ist. Zudem können geimpfte Personen das Virus ohne Erkrankung weiterverbreiten, auch wenn das Risiko im Vergleich zu ungeimpften Personen deutlich vermindert ist. Bitte beachten Sie deshalb weiterhin die AHA + L-Regeln.

Waa maxay noocyada falcelinta tallaalka ee dhici kara tallaalka kadib?

Kadib qaadashada tallaalka Jansen® COVID-19, fal-celinta guud iyo mida gaarka ah ee muddada-gaaban iyo kuwa ku-meel-gaarka ah way dhici karaan si ay u muujiyaan inuu jiro isdhexgal ka dhex dhacaya jirka iyo tallaalka. Dareen-celinadaas waxaa ka mid noqon kara qandho, qarqaryo, iyo astaamo kale oo hargab u eg. Badanaa astaamahaas waxay ku baaba'aan maalmo yar gudahood kadib qaadashada tallaalka. Si loo yareeyo astaamaha suurtagalka ah, daawada xanuunka/antipyretiga ah ayaa laga qaadan karaa qiyaasaha lagu taliyey. Dadka waayeelka ah, falcelinnadaas badankooda wax yar baa laga arkay marka loo eego dadka da'da yar. Falcelinada tallaalka ee ugu caansan ee la soo sheegay intii lagu guda jirey daraasadaha shati-siinta tallaalka Jansen® waxay ahaayeen danqasho goobta la duray ah (in ka badan 40%), madax xanuun, daal iyo murqo xanuun (in ka badan 30%), iyo lallabbo (in ka badan 10%). Marar badan (inta udhaxeysa 1% iyo 10%), qandho, qufac, daal, kalagoys xanuun, casaan iyo barar oo goobta la duray ah iyo qarqaryo ayaa la soo sheegay. Mararka qaarkood (inta udhaxeysa 0.1% iyo 1%), gariir, shuban, raaxo-darro, hindhiso, xanuun ku dhaca afka iyo cunaha, finan jirka guud ah, dhidid badan, murqaha oo daciifa, xaruun cududda gacanta ama lugta ah, dhabar xanuun, dareemid daciifnimo guud, iyo daciifnimo guud ayaa dhacda. Marka loo eego macluumaadka hadda la og yahay, inta jeer iyo nooca waxyeelada suurtagalka ah ee imaada kadib qaadashada qiyaasta 2aad ee tallaalka Jansen® COVID-19 waxay la mid yihiin kuwa la arko kadib qaadashada qiyaasta 1aad ee tallaalka.

Welche Impfreaktionen können nach der Impfung auftreten?

Nach der Impfung mit dem COVID-19 Vaccine Janssen® Impfstoff kann es als Ausdruck der Auseinandersetzung des Körpers mit dem Impfstoff zu kurzfristigen, vorübergehenden Lokal- und Allgemeinreaktionen kommen. Diese Reaktionen können auch Fieber, Schüttelfrost und andere grippeähnliche Beschwerden sein. Sie klingen für gewöhnlich innerhalb weniger Tage nach der Impfung wieder ab. Zur Linderung möglicher Beschwerden kann ein schmerzlinderndes/fiebersenkendes Medikament in der empfohlenen Dosierung eingenommen werden. Die meisten Reaktionen sind bei älteren Personen etwas seltener als bei jüngeren Personen zu beobachten. Die am häufigsten berichteten Impfreaktionen in den Zulassungsstudien zu COVID-19 Vaccine Janssen® waren Schmerzen an der Einstichstelle (mehr als 40%), Kopfschmerzen, Ermüdung und Muskelschmerzen (mehr als 30%) sowie Übelkeit (mehr als 10%). Häufig (zwischen 1% und 10%) wurde über Fieber, Husten, Ermüdung, Gelenkschmerzen, Rötung und Schwellung der Einstichstelle sowie Schüttelfrost berichtet.

Gelegentlich (zwischen 0,1 % und 1 %) traten Zittern, Durchfall, Missempfindung, Niesen, Schmerzen in Mund und Rachen, genereller Ausschlag, vermehrtes Schwitzen, Schwäche der Muskeln, Schmerzen in Arm oder Bein, Rückenschmerzen, allgemeines Schwächegefühl und Unwohlsein auf. Nach derzeitigem Kenntnisstand sind Häufigkeit und Art möglicher Nebenwirkungen nach der 2. Impfstoffdosis mit COVID-19 Vaccine Janssen® vergleichbar mit denen nach der 1. Impfung.

Dhibaatooyin in lala kulmo miyaa suurtagal ah tallaalka awgiis?

Dhibaatooyinka ka dhasha tallaalka ayaa ah saameynta tallaalka oo ka sarreysa heerka caadiga ah ee falcelinta tallaalka, taas oo si weyn u saameysa xaaladda caafimaad ee qofka la tallaalay.

Fal-celinada xasaasiyadda iyo barar/goob casaanta kadhalata iscuncunka ayaa ku dhacay kiisas naadir ah (0.01% ilaa 0.1%) kadib markii qofka lagu tallaalo tallaalka Jansen® COVID-19. Intaa waxaa dheer, kadib qaadashada tallaalka Janssen® COVID-19, xinjirowga dhiigga (tusaale ahaan, marinada dhiigga ee maskaxda ama sidoo kale caloosha) oo lala xiriirinayo hoos u dhaca tirada unugyada dhiigga (thrombocytopenia) ayaa lagu arkay kiisas dhif ah (in kayar 0.01%) oo ay kujiraan dhimasho xaaladaha qaarkood. Xaaladahan waxay dhaceen 3 usbuuc gudahood kadib qaadashada tallaalka waxayna ku badnaayeen dadka da'doodu ka yar tahay 60 sano. Intaa waxaa dheer, xaalado naadir ah oo ah xinjirowga xididdada dhiigga (xinjirowga dhiigga ee xididdada kaas oo dilaaci kara ama xannibi kara xididdada dhiigga kale) ayaa la arkay. Xinjirowga dhiigga xididdada ayaa, tusaale ahaan, keeni xannibaadda halbowladaha sambabka. Cudurka ah tirada unugyada dhiigga oo yeraada (hoos u dhaca tirada unugyada dhiigga platelet-ka iyada oo aan sabab cad jirin) ayaa aad dhif u ah kadib qaadashada tallaalka, mararka qaarkood dhiigbax iyo mararka qaarkoodna dhimasho. Kiisaska qaarkood ayaa ku dhacay gaar ahaan shakhsiyaadka taariikh ahaan soo qabay cudurka ah tirada unugyada dhiigga oo yeraada. Sidoo kale, tan iyo markii la bilaabay tallaalka, aad bay dhif u tahay (in ka yar 0.01%) in la arko xaaladaha dillaaca xididaha dhiiga kadib markii lagu tallaalo tallaalka Janssen® COVID-19, qaarna ahaa dadka horay u soo maray cilladda dillaaca xididaha dhiiga, qaarkoodna natiijadeedu ay noqotay dhimasho. Dillaacidda xididaha dhiiga (Capilla Leak Syndrome) ayaa dhacday dhowrkii maalmood ee ugu horreeyey tallaalka kadib waxaana lagu gartaa bararka gacmaha iyo lugaha oo si degdeg ah u kora, miisaanka oo degdeg u kordha iyo dareen daciifnimo, waxayna u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah. Intaa waxaa dheer, xaalado aad dhif u ah (in ka yar 0.01%) oo ah cillada Guillain-Barré syndrome ayaa la soo sheegay kadib markii lagu tallaalay tallaalka Janssen® COVID-19, mararka qaarkoodna natiijadeedu noqoto dhimasho. Cillada Guillain-Barré syndrome waxaa lagu gartaa daciifnimo ama curyaannimo lugaha iyo gacmaha, kaas oo ku fidi kara xabadka iyo wejiga waxaana laga yaabaa inuu u baahdo daryeel caafimaad oo degdeg ah. Xaalado dhif ah, bararka laf dhabarka (transverse myelitis) ayaa ka dhacay meel ka baxsan daraasadaha ansixinta tallaalka.

Sababo la xiriira muddada gaaban ee indha-indhaynta ee la sameeyo kadib qaadashada qiyaasta 2aad ee tallaalka Janssen® COVID-19, weli wax bayaano ah lagama bixin karo iyadoo lagu saleynayo daraasadda ansixinta tallaalka ee arrimaha la xiriira waxyeellooyinka tallaalka ee dhifka iyo naadirka ah. Tan iyo markii la soo saaray tallaalka, fal-celinno xasaasiyadeed oo degdegga ah (fal-celinta anaphylactiga) ayaa lagu soo warramey xaalado aad u dhif ah. Waxayna dhaceen waxyar kadib qaadashada tallaalka waxayna u baahdeen daaweyn caafimaad.

Si la mid ah tallaalada oo dhan, kiisas aad dhif u ah oo ah falcelin xasaasiyadeed oo degdeg ah oo gaaraya ayna ku jiraan shoog ama dhibaatooyin kale oo aan hore loo yaqiinay sida cudurka Guillain-Barré qeyb ahaan looma sooci karo.

Haddii astaamo ay soo baxaan kadib qaadashada tallaalka, kuwaas oo ka sareeya inta aan horay u soo sheegnay oo ah falcelinada degdegga ah ee guud, dhakhtarkaaga ayaa diyaar u ah inaad kala tashato arrimahaas. Haddii ay dhacdo waxyeello daran, gaar ahaan neefsashada oo kugu adkaato, laab

xanuun, bararka gacmaha ama lugaha, miisaanka oo si degdeg ah u kordha, daciifnimo ama curyaannimo lugaha, gacmaha, laabta, ama wejiga ah (kuwaas waxaa ka mid noqon kara, tusaale ahaan, aragga oo labanlaabma, dhaqaajinta indhaha oo kugu adkaada, liqidda, hadalka, calalinta, ama socodka, isuduwidada dhibaatooyinka, raaxo -darrada, ama dhibaatooyinka kontoroolka kaadiheysta ama shaqada mindhicirka), calool xanuun joogto ah, aragga oo xumaada, ama daciifnimo, ama haddii aad isku aragto madax-xanuun daran ama joogto ah ama aad isku aragto nabaro ama dhiig-bax ah meel ka baxsan meesha laga muday dhowr maalmood kadib qaadashada tallaalka, fadlan raadso daryeel caafimaad isla markiiba.

Waxaa sidoo kale jira ikhtiyaar ah inaad adiga laftaada ka warbixiso waxyeelooyinkaas gaarka ah: <https://nebenwirkungen.bund.de>

Marka lagu daro xaashidan macluumaadka, dhakhtarka bixinaya tallaalka ayaa ku siin doona fursad aad kula yeelato wada hadal uu kuugu cadeeyo wixii aad ka shakisan tahay.

Sind Impfkomplikationen möglich?

Impfkomplikationen sind über das normale Maß einer Impfreaktion hinausgehende Folgen der Impfung, die den Gesundheitszustand der geimpften Person deutlich belasten.

In seltenen Fällen (0,01 % bis 0,1 %) traten nach einer Impfung mit COVID-19 Vaccine Janssen® Überempfindlichkeitsreaktionen und Nesselsucht auf. Darüber hinaus wurden nach einer Impfung mit COVID-19 Vaccine Janssen® in sehr seltenen Fällen (weniger als 0,01 %) Blutgerinnsel (z.B. im Gehirn als Sinusvenenthrombosen oder auch im Bauchraum) verbunden mit einer Verringerung der Blutplättchenzahl (Thrombozytopenie) und bei einem Teil mit tödlichem Ausgang beobachtet. Diese Fälle traten innerhalb von 3 Wochen nach der Impfung und überwiegend bei Personen unter 60 Jahren auf. Darüber hinaus wurden selten venöse Thromboembolien (Blutgerinnsel in Venen, die sich ablösen und andere Gefäße verschließen können) beobachtet. Venöse Thromboembolien können z.B. eine Lungenembolie zur Folge haben. Sehr selten wurden nach der Impfung Immunthrombozytopenien (Verringerung der Blutplättchenzahl ohne erkennbare Ursache) beobachten, teilweise mit Blutungen und teilweise mit tödlichem Ausgang. Einige Fälle traten bei Personen mit Immunthrombozytopenie in der Vorgeschichte auf. Ebenfalls seit Einführung der Impfung wurden nach einer Impfung mit COVID-19 Vaccine Janssen® sehr selten Fälle von Kapillarlecksyndrom beobachtet, teilweise bei Personen, die früher bereits an einem Kapillarlecksyndrom erkrankt waren, und zum Teil mit tödlichem Ausgang. Das Kapillarlecksyndrom trat in den ersten Tagen nach Impfung auf und ist gekennzeichnet durch eine rasch fortschreitende Schwellung der Arme und Beine, plötzliche Gewichtszunahme sowie Schwächegefühl und erfordert eine sofortige ärztliche Behandlung. Berichtet wurden zudem sehr selten Fälle (weniger als 0,01 %) eines Guillain-Barré-Syndroms nach einer Impfung mit COVID-19 Vaccine Janssen®. Das Guillain-Barré-Syndrom ist gekennzeichnet durch Schwäche oder Lähmungen in den Beinen und Armen, die sich auf die Brust und das Gesicht ausdehnen können und die eine intensivmedizinische Behandlung erforderlich machen können. In sehr seltenen Fällen trat außerhalb der Zulassungsstudien eine Entzündung des Rückenmarks (transverse Myelitis) auf.

Auf Grund der kurzen Beobachtungszeit nach der 2. Impfstoffdosis mit COVID-19 Vaccine Janssen® können auf Basis der Zulassungsstudie bisher noch keine Aussagen über seltene und sehr seltene unerwünschte Impfnebenwirkungen gemacht werden. Seit Einführung der Impfung wurden in sehr seltenen Fällen allergische Sofortreaktionen (anaphylaktische Reaktionen) berichtet. Diese traten kurz nach der Impfung auf und mussten ärztlich behandelt werden.

Grundsätzlich können – wie bei allen Impfstoffen – in sehr seltenen Fällen eine allergische Sofortreaktion bis hin zum Schock oder andere auch bisher unbekannte Komplikationen wie ein Guillain-Barré-Syndrom nicht ausgeschlossen werden.

Wenn nach einer Impfung Symptome auftreten, welche die oben genannten schnell vorübergehenden Lokal- und Allgemeinreaktionen überschreiten, steht Ihnen Ihre Ärztin/Ihr Arzt zur Beratung zur Verfügung. Bei schweren Beeinträchtigungen, insbesondere Atemnot, Brustschmerzen, Schwellungen der Arme oder Beine, plötzlicher Gewichtszunahme, Schwäche oder Lähmungen der Beine, Arme, Brust oder des Gesichts (diese können beispielsweise Doppelbilder, Schwierigkeiten, die Augen zu bewegen, zu schlucken, zu sprechen, zu kauen oder zu gehen, Koordinationsprobleme, Missempfindungen oder Probleme bei der Blasenkontrolle oder Darmfunktion beinhalten), anhaltenden Bauchschmerzen, Sehstörungen oder Schwächegefühl oder wenn Sie einige Tage nach der Impfung starke oder anhaltende Kopfschmerzen haben oder Blutergüsse oder punktförmige Hautblutungen außerhalb der Einstichstelle auftreten, begeben Sie sich bitte unverzüglich in ärztliche Behandlung.

Es besteht die Möglichkeit, Nebenwirkungen auch selbst zu melden: <https://nebenwirkungen.bund.de>

In Ergänzung zu diesem Aufklärungsmerkblatt bietet Ihnen Ihre Impfärztin/Ihr Impfarzt ein Aufklärungsgespräch an.

Machadka Paul Ehrlich (PEI) wuxuu sameynayaa sahan ku saabsan u dulqaadashada tallaalada si looga hortago cudurka cusub ee loo yaqaan korona fayras (SARS-CoV-2) iyadoo la isticmaalayo barmijka (ablikeeshinka) taleefanka casriga ee SafeVac 2.0. Waxaad iska diiwaan gelin kartaa 48 saacadood gudahood kadib qaadashada tallaalka. Xog uruurinta waa ikhtiyaari.

Das Paul-Ehrlich-Institut (PEI) führt eine Befragung zur Verträglichkeit der Impfstoffe zum Schutz gegen das neue Coronavirus (SARS-CoV-2) mittels Smartphone-App SafeVac 2.0 durch. Sie können sich innerhalb von 48 Stunden nach der Impfung anmelden. Die Befragung ist freiwillig.



Google Play App Store App Store Apple

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19 iyo wixii ku saabsan tallaalka COVID-19 ka heli kartaa halkan

Weitere Informationen zu COVID-19 und zur COVID-19-Impfung finden Sie unter

www.corona-schutzimpfung.de

www.infektionsschutz.de

www.rki.de/covid-19-impfen

www.pei.de/coronavirus

Daabacaadda 1 Nooca 0013 (laga bilaabo 14ka Febraayo 2022)

Xaashidan macluumaadka waxaa soo diyaariyay Deutsches Grünes Kreuz eV, Marburg oo kaashanaysa machadka Robert Koch Institute, Berlin xaquuqda dabaabacaada macluumaadkan waa la ilaaliyay. Waxaa keliya dib loo daabici karaa, dib loo soo saari karaa ama loo gudbin karaa haddii aan loo isticmaalayn ganacsi ahaan iyada oo loo isticmaalayo keliya ujeedada laga leeyahay. In tafatir lagu sameeyo ama wax laga bedelo waa mamnuuc.

Ausgabe 1 Version 013 (Stand 14. Februar 2022)

Dieses Aufklärungsmerkblatt wurde vom Deutschen Grünen Kreuz e.V., Marburg in Kooperation mit dem Robert Koch-Institut, Berlin erstellt und ist urheberrechtlich geschützt. Es darf ausschließlich im Rahmen seiner Zwecke für eine nicht-kommerzielle Nutzung vervielfältigt und weitergegeben werden. Jegliche Bearbeitung oder Veränderung ist unzulässig.



in Kooperation mit



Taariikhda caafimaad ee tallaalka kahortaga COVID-19 (Coronavirus Disease 2019)
(Tallaalka aasaasiga ah iyo tallaalka xoojiyaha ah)

– iyadoo la isticmaalayo tallaalka vektarka – tallaalka Janssen® COVID-19 oo ay soo saartay Janssen Cilag International/Johnson & Johnson

Anamnese zur Schutzimpfung gegen COVID-19 (Corona Virus Disease 2019) (Grundimmunisierung und Auffrischimpfungen)

– mit Vektor-Impfstoff – (COVID-19 Vaccine Janssen® von Janssen Cilag International/Johnson & Johnson)

1. Adigu¹ hada ma leedahay cudur daran oo qandho wata? 0 Haa 0 Maya

1. Besteht bei Ihnen¹ derzeit eine akute Erkrankung mit Fieber? 0 ja 0 nein

2. Miyaa lagu tallaalay 14 -kii maalmood ee la soo dhaafay? 0 Haa 0 Maya

2. Sind Sie¹ in den letzten 14 Tagen geimpft worden? 0 ja 0 nein

3. Miyaad¹ horay u heshay tallaalka kadhanka ah COVID-19? 0 Haa 0 Maya

Hadii eey tahay haa, goormee iyo tallaalka? Taariikhda: Tallaalka:
Taariikhda: Tallaalka:
Taariikhda: Tallaalka:

(Fadlan keen kaarkaaga tallaalka ama cadeeyn kale oo ah balanta tallaalkaaga.)

3. Haben Sie¹ bereits eine Impfung gegen COVID-19 erhalten? 0 ja 0 nein

Wenn ja, wann und mit welchem Impfstoff? Datum: Impfstoff:
Datum: Impfstoff:
Datum: Impfstoff:

(Bitte bringen Sie Ihren Impfausweis oder anderen Impfnachweis zum Impftermin mit.)

4. Hadiiba¹ eey dhacdo inaad horay u heshay qiyaasta tallaalka 1aad ee COVID-19:

Miyaad¹ yeelatay dareen -celin xasaasiyad ah kadib? 0 Haa 0 Maya

Miyaad¹ ku yeelatay xinjir dhiiga (thrombosis) ka dib? 0 Haa 0 Maya

4. Falls Sie¹ bereits die 1. COVID-19-Impfung erhalten haben:

Haben Sie¹ danach eine allergische Reaktion entwickelt? 0 ja 0 nein

Haben Sie¹ danach ein Blutgerinnsel (Thrombose) entwickelt? 0 ja 0 nein

5. Miyaa si laysku haleeyn karo loo cadeeyay in adigu¹ horay kuugu dhacay korona fayraska ee loo-yaqaan (SARS-CoV-2)? 0 Haa 0 Maya

Hadii eey tahay haa, goorma?

(Kadib infekshanka SARS-CoV-2, tallaalka waxaa lagula talinayaa 3 bilood kadib ogaanshaha.)

5. Wurde bei Ihnen¹ in der Vergangenheit eine Infektion mit dem Coronavirus (SARS-CoV-2) sicher nachgewiesen? 0 ja 0 nein

Wenn ja, wann?

(Nach einer Infektion mit SARS-CoV-2 wird empfohlen, die Impfung 3 Monate nach Diagnosestellung durchzuführen.)

6. Miyaad¹ leedahay xanuunada raaga/dabadheeraada ama adigu¹ maleedahay dhibaatada difaac la'aanta jirka (tusaale. iyadoo ugu wacantahay daaweynta kiimikada, daaweynta difaac la'aanta jirka ama daawooyin kale)? 0 Haa 0 Maya

6. Haben Sie¹ chronische Erkrankungen oder leiden Sie¹ an einer Immunschwäche (z.B. durch eine Chemotherapie, immunsupprimierende Therapie oder andere Medikamente)?

0 ja 0 nein

Wenn ja, welche?

7. Miyaad¹ la-xanuun santahay xinjirowga dhiiga ama mise waxaad qaadata daawoyinka-khafiifiya dhiiga mise waxaa hore ula xanuunsatay cudurka ah tirada unugyada dhiigga oo yeraada (hoos u dhaca tirada unugyada dhiiga platelet-ka)??

0 Haa 0 Maya

7. Leiden Sie¹ an einer Blutgerinnungsstörung, nehmen Sie blutverdünnende Medikamente ein oder haben Sie früher an einer Immunthrombozytopenie (Verringerung der Blutplättchenzahl) gelitten?

0 ja 0 nein

8. Miyaad adiga¹ leedahay wax xasaasiyad ah oo la-yaqaan?

0 Haa 0 Maya

Hadii eey tahay haa, waa kee?

8. Ist bei Ihnen¹ eine Allergie bekannt?

0 ja 0 nein

Wenn ja, welche?

9. Waligaa¹ ma dareentay astaamo xasaasiyadeed, qandho sare, miyir beelid/suuxdin ama falcelino kale oo aan caadi aheyn kadib tallaalo hore oo kala duwan?

0 Haa 0 Maya

Hadii ay tahay haa, waa kee?

9. Traten bei Ihnen¹ nach einer früheren, anderen Impfung allergische Erscheinungen, hohes Fieber, Ohnmachtsanfälle oder andere ungewöhnliche Reaktionen auf?

0 ja 0 nein

Wenn ja, welche?

10. Uur¹ miyaad leedahay hadda?

0 Haa 0 Maya

(Kadib saddexda bilood ee labaad ee uurka, waxaa lagula talinayaa qaadashada tallaalka Comirnaty®, laakiin ma'aha tallaalka vektarka ee halkan lagaga hadlay)

¹ Tan waxaa ka jawaabi doona wakiilka sharciga ah, hadii ay khuseyso.

10. Sind Sie¹ schwanger?

0 ja 0 nein

(Eine Impfung mit dem Impfstoff Comirnaty® wird ab dem 2. Schwangerschaftsdrittel, nicht jedoch mit dem hier besprochenen Vektor-Impfstoff empfohlen.)

¹ Ggf. wird dies von der gesetzlichen Vertretungsperson beantwortet

Bayaanka Ogolaanshaha qaadashada tallaalka kahortaga COVID-19

(Tallaalka aasaasiga ah iyo tallaalada xoojiyaha ah) – Iyadoo la isticmaalayo tallaalka vektarka – (tallaalka Janssen® COVID-19 oo ay soo saartay Janssen Cilag International/Johnson & Johnson)

Einwilligungserklärung zur Schutzimpfung gegen COVID-19 (Corona Virus Disease 2019) (Grundimmunisierung und Auffrischimpfungen) – mit Vektor-Impfstoff – (COVID-19 Vaccine Janssen® von Janssen Cilag International/Johnson & Johnson)

Magaca qofka la tallaalayo (magaca awoowaha, magaca koowaad):

Taariikhda Dhalashada:

Ciwaanka:

Name der zu impfenden Person (Name, Vorname):

Geburtsdatum:

Anschrift:

Waxaan u fiirsaday waxyaabaha xaashida macluumaadka ku qoran waxaana fursad u helay inaan falanqeyn faahfaahsan la yeesho dhakhtar keeyga tallaalka bixinaya.

- Aniga ma-qabo wax su'aalo dheeraada ah oo waxaan si cad uga tanaasulay dooddii caddaynta caafimaadka
- Waan oggolahay qaadashada tallaalka lagu taliyay ee ka dhanka ah COVID-19 ee tallaalka vektor-ka ah.
- Waan diiday tallaalka.

Ich habe den Inhalt des Aufklärungsmerkblattes zur Kenntnis genommen und hatte die Möglichkeit zu einem ausführlichen Gespräch mit meiner Impfärztin/meinem Impfarzt.

- Ich habe keine weiteren Fragen und verzichte ausdrücklich auf das ärztliche Aufklärungsgespräch.
- Ich willige in die vorgeschlagene Impfung gegen COVID-19 mit Vektor-Impfstoff ein.
- Ich lehne die Impfung ab.

Fasiraado:

Goobta, taariikhda:

Saxiixa qofka qaadanaya tallaalka

Saxiixa dhakhtarka

Hadii qofka la tallaalayo uusaan awood u laheyn inuu bixiyo oggolaansho:

Intaa waxaa u dheer dadka saaran mas'uuliyadda ilaalinta ilmaha: *Waxaan cadeynayaa in la i siiyay oggolaansho ah in aan bixiyo oggolaanshahan waxaana isiiyay awaadaas qof kale oo leh xuquuqda xannaanaynta ilmaha.*

Saxiixa qofka loo wakiishay inuu bixiyo ogolaansho (illaaliye, Daryeel bixiye sharci ama masuul)

Haddii qofka la tallaalayo uusan awood u lahayn inuu bixiyo oggolaansho, fadlan sidoo kale bixi magaca iyo faahfaahinta xiriirka qofka loo wakiishay inuu bixiyo oggolaansho (illaaliye, bixiyaha daryeelka sharciga ama mas'uulka):

Magaca Awooga , Magaca Kowaad:

Taleefon nambarka.:

iimaylka:

Anmerkungen:

Ort, Datum

Unterschrift der zu impfenden Person

Unterschrift der Ärztin/des Arztes

Bei fehlender Einwilligungsfähigkeit der zu impfenden Person:

Bei Sorgeberechtigten zusätzlich: *Ich erkläre, dass ich von etwaigen anderen sorgeberechtigten Personen für die Einwilligung ermächtigt wurde.*

Unterschrift der zur Einwilligung berechtigten Person (Sorgeberechtigte, Vorsorgeberechtigte oder Betreuerin/Betreuer)

Falls die zu impfende Person nicht einwilligungsfähig ist, bitte auch Namen und Kontaktdaten der zur Einwilligung berechtigten Person (Sorgeberechtigte, Vorsorgeberechtigte oder Betreuerin/Betreuer) angeben:

Name, Vorname:

Telefonnr.:

E-Mail:

Xaashidaan maclumaadka waxaa soodiyaariyay Deutsches Grünes Kreuz e.V., Marburg iyadoo kaa-shaneeysa Machadka Robert Koch, ee Berlin waana xuquuq dhowran. Waa la soosaari kara oo la gudbin karaa iyadoo aan loo-isticmaalin ganacsi oo loo adeegsanaayo ujeedada laga leeyahay. Tafaftir ama wax ka badal kasta waa mamnuuc.

Daabacaha: Deutsches Grünes Kreuz e.V., Marburg
Iyadoo lala kaashanaayo Machadka Robert Koch, Berlin
Daabacaada 007 Nooca 0010 (laga bilaabo 14ka Febraayo 2022)

Dieser Anamnese- und Einwilligungsbogen wurde vom Deutschen Grünen Kreuz e.V., Marburg in Kooperation mit dem Robert Koch-Institut, Berlin erstellt und ist urheberrechtlich geschützt. Er darf ausschließlich im Rahmen seiner Zwecke für eine nicht-kommerzielle Nutzung vervielfältigt und weitergegeben werden. Jegliche Bearbeitung oder Veränderung ist unzulässig.

Herausgeber Deutsches Grünes Kreuz e.V., Marburg
In Kooperation mit dem Robert Koch-Institut, Berlin
Ausgabe 001 Version 010 (Stand 14. Februar 2022)